

COMUNE DI FIRENZE  
*Assessorato alle Politiche del lavoro e Immigrazione*  
*Consiglio Territoriale per l'Immigrazione - Firenze*


# IMMIGRAZIONE

## La normativa somalo

(Guida ragionata al Testo Unico sull'immigrazione, D. Lgs. 25 luglio 1998,  
n. 286 come modificato dalla Legge 30 luglio 2002, n.189)

**Luigi Mughini, Anna Zucconi**

Edizione aggiornata a febbraio 2003



## INDEX

Gargaarka caafimaadka ( <i>Assistenza sanitaria</i> )	p. 4
Warqadda Joogida ( <i>Carta di soggiorno</i> )	p. 6
Jinsiyada talyaaniga ( <i>Cittadinanza italiana</i> )	p. 8
Midab takoorka xag midab, qabiil, jinsiyada iyo diinta ( <i>Discriminazione per motivi razziali, etnici, nazionali e religiosi</i> )	p. 11
Dal ka saarida ( <i>Espulsione</i> )	p. 12
Soogalida shaqo madaxbanan ( <i>Ingresso per lavoro autonomo</i> )	p. 13
Soogalida shaqo xilliyeedka ( <i>Ingresso per lavoro stagionale</i> )	p. 14
Soogalida shaqo cid-kale ( <i>Ingresso per lavoro subordinato</i> )	p. 15
Diiwaangalinta Dowladda Hoose iyo Waajibaatka marti galiyaha ( <i>Iscrizione anagrafica e obblighi dell'ospitante</i> )	p. 16
Isku qorida dugsiga qassabkaa ( <i>Iscrizione scuola dell'obbligo</i> )	p. 17
Guurka ( <i>Matrimonio</i> )	p. 18
Ogolashada joogida shaqo cid-kale ( <i>Permesso di soggiorno per lavoro subordinato</i> )	p. 19
Ogolashada Isu imaadka Qoyska ( <i>Permesso di soggiorno per motivi familiari</i> )	p. 20
Daryeelka bulshada ( <i>Protezione sociale</i> )	p. 21
Dhimida ama Reebida bixida lacagta adeega miiska dugsiga ( <i>Riduzione o esonero dal pagamento del servizio di refezione scolastica</i> )	p. 22
Soo galidda iyo Ogolashada joogida waxbarashada ( <i>Visto d'ingresso e permesso di soggiorno per studio</i> )	p. 23
Soo galidda iyo Ogolashada Isu imaadka Qoyska ( <i>Visto d'ingresso e permesso per motivi familiari</i> )	p. 27
Cinwaanka wax ku oolkaa ( <i>Indirizzi utili</i> )	p. 30

Publicazione promossa dall'Assessorato Politiche del Lavoro e Immigrazione in collaborazione con il Consiglio Territoriale per l'Immigrazione - Firenze

Testi: Avv. Luigi Mughini, Associazione Progetto Arcobaleno Onlus  
Anna Zucconi, Caritas Diocesana di Firenze

Coordinamento: U.O. Immigrazione, Direzione Sicurezza sociale, via L. Da Vinci 4a, Firenze, tel. 055  
2767512/7513

e-mail: [immigr@comune.firenze.it](mailto:immigr@comune.firenze.it)

Organizzazione editoriale: Comune Network


Traduzioni: Cooperativa srl Mondo Unico



Grafica ed impaginazione: Homographicus

Stampa: IT. COMM.

ISBN 88-86320-94-9

Tutti i testi sono sul sito [www.comune.firenze.it/servizi\\_publici/stranieri/immigra.htm](http://www.comune.firenze.it/servizi_publici/stranieri/immigra.htm)





Iskuqoridda Adeega Caafimaadka Qaranka waxay kuu kafaalaqaadee caalmaha caafimadka sida dadka wadanka talyaaniga u dhashay.

## 1) Iskuqoridda Adeega Caafimaadka Qaranka Qassabka ah

### Cidda ay khusayso:

Dadka ajnabiga oo leh ogolashada joogidda, ama codsaday in dib loogu cuboonaysiiyo, sababaha hoos ku xusan awgood:

- shaqo cidkale
- shaqo madaxbanaan
- sababaha qooyaska
- magangal (sida uu qabo Heshiiska Ginevra)
- sababaha bani'adannimo
- codsashada magangalka (sida uu qabo Heshiiska Ginevra)
- sugidda la wareega (adozione)
- sugidda aaminidda (affidamento)
- qaadashada dhalashada.

Adega caafimaadka waxaa leh dadka ka tirsan qoyska oo xilkoodu ku saaranyahay, si sharci ahna wadanka ku jooga ( haddi aysan lahayn ogolasho joogid oo u ogolaanaysa adeega caafimaadka), iyo caruurta, lagabilaabo marka ay dhashaan.

### Goobta iyo dukumeeniga loogau baahanyay iskuqoridda

L/H xarumaha deegaanka (Distretto Socio Sanitario) ASL ee Degmada deegaanka ama degmada ogolashda joogidda ku qoran.

### Lagama maarmaan ma'ahan degganaashada rasmiga ah ee waddanka talyaaniga

Si loo codsado isku qoridda waxaa loo baahanyahay:

- ogolaashda joogidda (haddi la cuboonaysiinayo rasiidkii codsiga)
- shaqalaawaha: shahaadda isku qoridda liiska shaqalaawayaasha.


### Muddada diiwaanka

Waqtiga diiwaanku wuxuu ladhacaa ogolaashada joogidda, waxaana lagu dheeray karaa rasiidka codsiga cusboonaysiinta ogolaashada joogidda ama ogolaashada joogidda la cusboonaysiiyay.

### Qaadashda Buuga Cafimaadka diiwaangalinta kadib

Buuga Cafimaadku wuxuu kuu saamaxaa inaad heshiid kharajla'an, ama bixin lacag yar (Ticket) adeegyada hoos ku xusan:

- doorashada dhakhtarka qoyska iyo kan caruruuta inta da'doodu u ka gaarayso 6 sano. 6 illa 14 sano waxaa la doora karaa dhakhtarka caruurta ama kan qoyska.
  - cudur baar guud iyo kan gaarka ah ee rugta caafimaadka
  - cudur baarka auriga
  - ispiitaal jiiifka
  - talaalada
  - baaridda dhiiga, raajada iyo masawirka (ecografia)



- daawada
- gargaarka dibuabaynta iyo ilka galidda iwm.

Haddi la xado Buuga Cafimaadka ama uu lumo: waa in latagaa xarunta caafimaadka laga diwaangashanyahay, warqad aqoonsina ku wehliso, lana qoro baafin. Islamaarkaa waxaa la helaa mid la mida.

## 2) Iskuqoridda banaan ee Adeega Caafimaadka Qaranka

### Cidda ay khusayso:

Dadka ajnabiga oo leh ogolasho joogid oo ka duwan kuwa kor ku xusan.

Dankan ajnabigaa waa inay isaga caymiyaan khatarta cudurka, jabka iyo uurka, siyaabaha hoos ku xusan midood:

- shahaadada caymiska ee shikadaha caymiskawadhanka ama kuwa ajnabigaa oo ku baahsan wadhanka (iska hubi adeegyada caymisku bixinayo)
- isku qoridda S.S.N. ayadoo la bixinayo lacag ku jaango'an dakhliga sanidkii ku soo gala. Isku qoridaas waxa lawadaga ximnaha qoyska intaan ka ehayn
  - ardada ajnabigaa oo gali kara caymiska kor ku xusan ama isku qorikara adeega banaan ee S.S.N. ayagoo bixinaaya lacag dhan Euro 149.77
  - dadka ajnabigaa oo cidaha lajooga oo gali kara caymiska kor ku xusan ama isku qorikara adeega banaan ee S.S.N. ayagoo bixinaaya lacag dhan Euro 219.49.

Goobta iyo dukumeeniga loogau baahanyay iskuqoridda

L/H xarumaha deegaanka (Distretto Socio Sanitario) ASL ee Degmada deegaanka ama degmada ogolashda joogidda ku qoran.

### Lagama maarmaan ma'ahan degganaashada rasmiga ah ee waddanka talyaaniga

- bixidda lacagta loobaahanyahay
- ogolaasho joogis oo ka badan 3 bilood (waqtigu waa ka yaraakra haddi ay khusayso arday ama kuwa cidaha la jooga (alla pari)).

### Muddada diiwaanka

Sanad walba waa inla cusboonaysiyaa diiwaanka banaan wuxuu ladhacaa 31 Dishember. Marwalbaba lacagta waa inlabixiya kulligeed waloow la isdiwwangaliyo sanadka dhaxdiisa.

Looma ogola inay isku qoran, dadka ajnabigaa ee sabab caafimaad ama dhal xiis u jooga.

## 2) Dadka ajnabigaa ee sharci la'anta ku jooga

Dadka ajnabigaa ee sharci la'anta ku jooga waxa loo ogolyahay:

- Daawada rugta caafimaadka iyo ispiitaalada degdegaa ama muhiimkaa ee la xiriira cudurada khatarta ama jabka. Waxaa kale oo daawaynaa kuna keeni kara cudura halis u ah caafimaadka ama noloshu qofka mar dambe (sida sokorta (diabeta), cudurada wadnaha, cudurada sambabaha, dhig karka, iwm)
- Si gaara waxaa loo dawayna:
  - i. barnaamijada daawada ka hortagga
  - ii. uurka iyo dhalidda
  - iii. caafimaadka caruurta

- iv. talaalada
- v. ka hortagagga caalamigaa
- vi. ka hortagga, baaritaanka iyo daawaynta cudurada faafa

Adeegyadan waxaa loo fidinaa, kharajla'an, bukaansocodka faqiirka ah.

**Sida sharciga wadhanka talyaanigu qabo, dadka ajnabigaa ee sharci la'anta ku jooga ee soo doonta adeegyada rugta caafimaadka, loo gudbimaayo magacyadooda ciidanka amaanka, addii aysan danbi galin.**

#### Tesserino S.T.P. (qofka qalaad ee waqti gaaban jooga)

Qofka ajnabigaa ee sharci la'anta ah, waxaa la siinaa nambar goboleed lagu magacabo STP oo lix bilood ku eg lana cusboonaysiiqaro haddi qofku wali waddanka<sup>1</sup> uu joogo, si loogu fidiyo adeegyada rugta caafimaadka iyo isbitaalada.

Caddeynta dhalashada ilmaha

Cidda ay khusayso

#### Caddynta dhalashada ilmaha waa in loo gudbiyo

- 3 maalmood gudahood xaafiska cadynta dhalashada isbitaalada uu ku dhashay
- 10 maalmood gudahood degrada uu ku dhashay ama waridku uu leeyahay deegannka (haddi waaridku kala deegaanyahay, kan hooyo ayaa laga diiwaan galinaa, haddii heshiids gaar ah uu san jirin.

<sup>1</sup> Rugaga caafimaadka iyo arimaha bulshada oo laga qaada karo Tessera STP iyo wargalinta ee Degmada Firenze (rugaga kale ka fiiri "Guida ai Servizi"- IV edizione – ee Servizio Immigrazione del Comune di Firenze.

- Via Verdi 16, tel. 055 244552
- Via di Ripoli 96, tel.055 6580546
- Lungarno Santa Rosa 13, tel. 055 2285897 - furan jimcaha saacadda 12.30 - 14.30
- Viale Matteotti 48, tel. 055 62641
- Viale Morgagni 33, tel. 055 2285300



## WARQADA JOOGISTA LA CARTA DI SOGGIORNO

#### Dadkey khussayso:

Ajnabiga deggan si sharci ah Itaaliya ugu yaraan 56 sano, heystana ogolaashada joogidda oo la cusbooneysiin karo hadii ay dhacdo.<sup>1</sup>

#### Xafiisyada lala xariirayo:

Xafiiska booliska(questura): Warqada codsiga,hay' adda caafimaadka ee degmadaas (ASL) ama Dowlada hoose(Ufficio Tecnico del Comune/Sevizio Casa)-qaybta howlaha guryaha: Shahaada cadeynaysa ku filnaanashada guriga, maxkamada(Shahaadada dambi la' anta -Certificato del casellario giudiziale ) ama wakaalada jamhuuriyada(procura) : shahaadada dacwad aanan socon(certificato dei carichi pendent).



#### Waraaqaha loo baahan yahay:

Codsiga waxaa lagu tilmaamaa

- Haybta oo dhamystiran
- Mesha ama meelaha uu deganaa qofka ajnabigaa 6dii sano oo la soodhaafay
- Dakhligiisu inta u gaaro
- Mesha uu deganyahay

#### Codsiga waxaa lagu lifaqaqaa:

- Sawirka baasaboorka ama dukuminti u dhigma ama dukuminti aqoonsi ah oo ka soo baxay dowlada talyaaniga kuna dhigantahay wadanka, waqtiga dhalashada (walow la tilmaamo sanadka kaliya) iyo mesha dhalashada
- Sawirka warqada cadeynaysa inta soo gashay sanadkii la soo dhaafay ama foomka-101(CUD) ee shaqa bixiyaha ; lacagtaas waa ineysan ka yaraan lacag nololeed ku filan qoyska(assegno sociale).<sup>2</sup>
- Shahaadada dambi la'aanta iyo tan dacwo la'aanta.
- Afar sawir ee qofkaas.

#### Ehelkiisana?

Qofka ajnabiga waa u waydiin karaa warqada dagananshaha ilmihisa aan qaangaarin 18 sano ee la nool iyo qofkey is qabaan islama nool yihiin

Codsiga waxaa lagu lifaqaqaa

- Shahaado cadeynaysa qoysnimadooda(ilmaha aan qaan gaarin iyo qofkey is qabaan) oo ka soo baxday dowlada wadanka qofka uu u dhashay, lagana soo sharciyeeyay wakiilka dowlada talyaaniga u fadhiga wadankaas.
- Dukuminti cadaynaya inaad heli kartid gurri ku filan qoyska, luguna noolakaro, sida ku xusan sharci gobooleedka guryahaha deegaanka. Haddi caruurto ay da'doodu kayartahay 14 sano wa in ogolaasho la helaa cidda goriga leh. Dukumentigaas waxaa laga bixinaa Dowladda Hoose<sup>3</sup> ama Hay'adda caafimaadkaya degaanka<sup>4</sup>
- Dukumeenti cadaynaya inuu helo sanadkii lacag u dhiganta lacag sanadeed ku filan qoyska(assegno sociale annuo) haddi qofkaliya loowaydiinayo, labalaab haddii loo codsanayo labo ama seddex ehelo, seddaxlaab haddi loo codsanayo afar iyo wixii kabadan. Dakhliga la tixgalinayo waa tan ximnaha qoyska oo aan la masruufin.


Haddi warqada deganaashada uu cosado xaaska ajnabigaa ama waaridka la nool qoof talyaaniga ama ka tirsan midowga yurub e ku nool Talyaaniga, waxaa loo baahanyahay in la tilmaamo haybta xaaska talyaaniga ama owlaada talyanigaa lana noolyahay.

Ilmaha aan qaan gaarin, warqadda deganaashada waxaa u codsanaya waaridka mas'uulka ka ah.

Waxxa lagu lifaqaqaa<sup>5</sup> sawir qofkasta oo ka mid ah qoyskaa ee ku qoran warqada dagananshaha.

#### Bixidda warqadda deganaashada:

Xafiiska booliku (Questura) wuxuu bixinaa rasiid, isagoo tilmaamaya maalinta ay diyaartahay. Rassidku uma dhigmo warqadda deganaashada, taasoo labixinayo 90 maalmood gudahood, kaddib marka la hobsado inuu xaq u leeyahay (waxaa la baaraa dambi la'aanta).



### Haddi la diido ama lana noqdo?

Hadii qofka loo diido ama lagala noqdo wuxuu dacwo geysan karaa Tribunale amministrativo regionale (T.A.R.) 60 maalmood. Dal kasaarka dadka leh warqadda deganaashada waxaa amraa haddi ay jiraan sababao culu oo la xiriira amanka wadhanka.



### Waqtiga warqadda deganaashada:

Warqadda deganaashadu waqtigeedu ma xaddadna, laakiin warqad aqoonsi ahaan wahay ku dhacaysa 10 sano, lana cuboonaysiinayo 5 sanaba mar, isagoo qofku codsi sameynaayo kuna lifaaqayo sawiro cusub.

### Faiidada warqadda deganaashada

Qofka ajnabigaa waa

- Ku soogalikaraha talyaaniga fiisa la'aan
- Wuxuu ka howgalikaraha shaqo kasta, haddi laga reebo kuwa gaarka u ah dadka talyaanigaa
- Waxaa u furan adeegyada xaafiisyada dowladda<sup>6</sup>
- Wuxuu ka qayb gali karaa noolaashada bulshada, isagoo ka qaybqaadanaya doorashooyinka degmada haddi qanuunka qaybtaas ogolyahay.

1 Wareegtada N.300/C/2002/1281/P/12.214.9/1^DIV. ee Wasaarada gudaha – Waaxda amaanka bulshada – waxay sheegee “in loo fasirto ogolashda joogidda la cusbonaysii karo marwalba in loola jeedo marka codsiga lagaysanayo, lamana xiriirto shantii sano ee la soodhafay”. ( 6 sano sida uu qabo sharciga cusub)

2 Jeega daryeelka bulshada waxaa kuyal lacag dhan (assegno sociale) Euro 4557,41

3 Comune di Firenze - Servizio Casa, Viale Guidoni 158, jidka naafadu waa Via Almerigo da Schio 1

4 Azienda Sanitaria – dadka degan Firenze: Ufficio Igiene e Sanità Pubblica, Via di San Salvi 12

5 Daawadaha la xukumay waa kuwa la xiriira dambiyada ku xusan Art. 380 ee CPP kuna kooban kuwa dadban (delitti non colposi) sida ku cad Art. 381 ee CPP.


6 Part. 80, qodobka 19, ee sharciga 23 diseenbar 2000. n. 338, wuxuu qoraa waxyaabo dan u ah dhaqala ahaan, sida ku cad art. 41 del D.L.vo 286/98, oo loo fidinayo dadka ajnabigaa ee helay warqada joogista: **Jeega daryeelka bulshada (assegno sociale)** (Quxuutigu uma baahna warqada joogista), **adeegyada iyo gunnda dadka naafadaa, dhagoolayaasha iyo indhalaawooyinka** (ilmaha naafadaa waa in laguqoro warqada joogista waaridka). Waxaa laga codsanaa ASL ka ay khusayso.

## JINSIYADDA TALYAANIGA CITTADINANZA ITALIANA

Lahaashada jinsiyada talyaaniga waxaa lagu dabaqaa shaaarciga n. 91 ee 5 faberwari “nuove norme sulla cittadinanza”, Wareegtada Madaxtooyada (DPR) n. 572 ee 12 oktoobar 1993 “regolamento di esecuzione della legge 5 febbraio 1992 n. 91 recante nuove norme sulla cittadinanza” iyo Wareegtada Madaxtooyada DBRn. 362 ee 18 ka abriil 1994 e la xiriira “regolamento recante disciplina dei procedimenti di acquisto della cittadinanza italiana”

### 1) Toos u lahaasho

- a. Ciddi u dhalata (criterio dello jus sanguinis)
- b. U gudbin toosan (comunicatio juris): qofka ajnabigaa ee tayaani naqda wuxuu si toos ah ugu gudbinnaa dhalashada talyaaniga caruurtiisa aan qaan gaarin oo hadday qaangaar noqdaan waa diidikaran jinsiyada talyaaniga



haddi midkale leeyihiin (caruurt qaangaartay ee doonaaya jinsiyada talyaaniga waa inay maran habka jinsiyada lagu qaato).

### Maxaa loo baahanyahay

Waa in caruurta ay la nooshahay waalidkooda jinsiyada qaadanaa, tasoo ku cad shahaadada qoyska ama dukumeenti kale oo u qalma.

### 2) Sharciga oo kuu fidiyay

Codsashada jinsiyada talyaaniga ee qofka ajnabigaa kama reebana in sida ay doonto dowladdu ka yeelikarto.

#### Cidda ay qusayso

- a. Ruxii ajnabiya ama waddan-laawaa meelkastaba ha ku dhashee oo aabihii ama hooyadii ama awooweyashii mid kamida ay horay uu ahayeen dad talyaaniga u dhashay kadi haba katagaanee. Ciddi danayneesa waa inay dhoowrto ugu yaraan midkood waxyaabaha hoos ku xusan:
  - waa inuu gutaa hoawsha qaranka ee talyaaniga, isagoo sii sheegaya inuu doonaayo jinsiyada talianiga
  - xilqaad la xiriira shaqo uu u qabto doowladda talyaaniga, dibaddaba ha ahaatee, caddeeyana inuu doonaayo jinsiyada talyaaniga
  - inuu si sharciya ku dagganyahay talyaaniga, ugu yaran labo sano, markuu 18 jirsaday, caddeeyana sanadka soo socda gudihiisa inuu doonaayo inuu qaato jinsiyada.
- b. Ajnabiga ku dhashay waddanka talyaaniga si sharciya ee isdabajjoogana ku dagganaa waddanka illa iyo intuu ka qaan-gaaro.

**Maxaa laga doonaa:** inuu ka caddeeyo Doowladda Hoose ee degmadiisa sand gudihi, qaangaarkiisa kadib. Sargaalka xaafiiska diiwaanka, markuu hubsado inuu xaq u leeyahay kadib, ayuu diwaangalinayaa muwaadhinka cusub. Markaanoo kale jinsiyadiisii hore ma dhuminaayo.

### 3) Jinsiyadayn

(jinsiyada lagu qaato wareegto mamulku soo saaro)

- a. Guur awgii

#### Waxa lagu mutaysto

- Ugu yaraan deganaasho 6 bilooda guurka kadib ama ugu yaraan 3 sano oo ka soo wareegato maalintii guurku dhacay
- Wadciiga guurka waqtiga wareegtada: sida ay qabto Wasaaradda Arrimaha Gudaha xiriirka guurku waa inuu jiraa marka la soo saaraayo wareegtada wasaaradda ee jinsiyada lagu bixinaayo. Golaha Qaranku (Consiglio di Stato) laakiin wuxuu leeyahay, waxa ku filan inuu xiriirku jiray, waloow waqtiga codsiga la gudbinaayo uusan jirin.

#### Ximnaha lagala xiriirayo

Xaffiska barasaabka -Prefettura- (ama qunsuliyadaha, haddii dibadda la joogo) Wasaaradda Arrimaha gudaha: waa inay soo saartaa 2 sano gudahood wareegtada

jinsiyada lagu ogolaanayo ama lagu diidayo; waqtigaa kadib, qofkii codsaday waxaa u bislaaday xaq dhab ah (silenzio assenso).

**Sababaha lagu diidikaro:** haddi ay jiraan danbiya culus iyo dhibaato la xiriirta ammanka guud. Markaas Wasaaraddu wa diidi kartaa codsiga labo sano gudahood.

Codsi cusub waxaa la soo gudbi karaa 5 sano kadib.

b. Jinsiyada caadigaa

Waxaa ay ku xirantahay hadba siduu maamulku u garoowsado, waxaana lagu soo saaraa wareegtada madaxwaynaha jamhuriyadda, isagoo tixgalinaya fikrada Guddiga qaranka (Consiglio di Stato) iyo soo gudbinta wasaaradda Arrimaha Gudaha.

**Waxa looga baahanyahay**

- sanadaha xiriirka ee loo baahanyahay in la dagganyahay (dadka ajnabigaa ee si sharciya waddanka ku jooga)

- Ku dhashay talyaaniga ama ku abtirsada tayani: 3 sano
- Dadka ka tirsan midowga yurub: 4 sano
- Ajnabiga la sookorsaday ee qaangaaray: 5 sano
- Waddan-laawayaasha (apolidi) ama quxuutiga: 5 sano
- Dadka aan ka tirsanayn midowga yurub: 10 anni
- Danbi la'aan
- Gudashada waajibaadka canshuurta
- Iskufilnaasho dhaqaale: codsiga waa ladiida danta guud awgeed haddi dakhligu ku filnayn (Euro 8779,77)

**Ximnaha lala xiriirayo**

Xafiska barasaabka (prefettura) - Xafiska Jinsiyada

Haddi dokumentigu qabyo yahay, xaafiiska barasaabku wuxu soojeedinaa in la dhamaystiro 30 maalmood gudahood. Waqtigaa kadib, hadaan wali la dhamaystirin waa diidi karaa codsiga isagoo qiil u yeelaa.

**Wasaarada arrimaha gudaha**

Arimaha jinsiyada la xiriira wa inay ku dhamadaan 2 sano gudahood; sida caadigaa, laakin, jawaabtu aad ayeey u daahi kartaa mana jiro waqti cayinan oo ugu badnaan la sugo.

**Labo jinsiyadood** looma ogola dadka ajnabigaa ee doonaaya inay ku qaataan sida caadigaa: mamulka ayaa toos u codsanaya in dhalashadii hore laga xuroobo.<sup>1</sup>

Warqadda codsiga jinsiyada caadigaa ee Wasaradda Arrimaha Gudaha, waxaa lagu tilmaamaa in shahaadada dhalashada hore ka xurwoogeeda innaa lala keenayn codsi-qabadka, lakiin loobaahanyahay marka ay soo waydiiso qaybta wasaarada u qaabishan jinsiyada.

<sup>1</sup> Ka xurwoga dhalashada hore waxaa lagu soosaaray hab maamul, sida ku qayaxan Art.1 qodobka 4 ee Wareegtada Madaxwaynaha Jamhuriyadda (DPR) n.362 ee 18 abriil 1994 oo u ogolaanaysa wasaaradda arimaha Gudaha inay soo saarto wareegto keedaa, oo ay ku amrayso dokumenti dheeraada in lagu lifaqa codsiga.



**MIDABTAKORKA XAG MIDAB, QABIIL,  
JINSIYADA IYO DIINTA**  
DISCRIMINAZIONE PER MOTIVI RAZZIALI,  
ETNICI, NAZIONALI E RELIGIOSI

**Dadkay qusayso:**

- cid kasta, talyaania ama ajnabiga, oo ay latahay in la midabtakooray xaqqoda, inay helaan adeeg ama shaqo sabab qabiil, midab, asalka ama dhalashada ama reerka, jinsiyada, luqada, fikradaha iyo dhaqan diimeed
- wakiilada degmooyinka ururada shaqaalaha ee heer qaran.

**Midabtakoor waxaa ku kacaya:**


- sargaal ama qof loo xilsaaro adeega dadwaynaha ama howl ka haya adeeg dadwaynuhu u baahanyahay kaasoo, isagoo wada shaqadiisa, ku kaca ama qariya waxyaabo sharci uusan ogolayn oo lugula kacayo qof Talyaaniya ama ajnabiya, sababtuna ay tahay ajnabinimadiisa ama inuu ka mid yahay dad gooniya, asalkiisa ama dhalashadiisa
- cidkasta oo ku qassabta waxyaabo wax u dhimaaya ama u diida inuu siiyo hanti ama adeeg loogu talagalay dadwaynaha qof ajnabiya sababtuna ay tahay ajnabinimadiisa ama inuu ka mid yahay dad gooniya, asalkiisa ama dhalashadiisa
- cidkasta oo si sharei darraa ku qassabta waxyaabo wax u dhimaaya ama u diida ka qab galka shaqada, hooyga, waxbarashada, tababarka, iyo adeega iyo gargaarka bulshada oo si sharciya ku daggan qof ajnabiya sababtuna ay tahay ajnabinimadiisa ama inuu ka mid yahay dad gooniya, asalkiisa ama dhalashadiisa
- cidkasta ee hor istaagta, si gacanqaada ama qarín ah, qabashada howl dhaqaale oo si sharciya uu u furtay qof ajnabiya sababtuna ay tahay ajnabinimadiisa ama inuu ka mid yahay dad gooniya, asalkiisa ama dhalashadiisa
- loo shaqeyaha ama wakiiladiisa haddii ay ku kacaan, si toosa ama si dadban, waxyaabo midabtakoor shaqaale, sababtuna ay tahay inuu ka mid yahay dad gooniya, reerka ama luqada, diinta ama jinsiyada

**Xaafiisyada lala xiriirayo**

- maxkamada degmada cidda ay khusayso, isagoo soo gudbinaa dacwadiisa uu fiiri doono Garsoore, kaasoo xukmikara in la dhafo takooridda, ama qadi kara tilaabada ku haboon joojinta dhibaata takoorka. Garsooruhu, haddii uu garowsado dacwada, wuxuu ku xukumikaraa, ciiddi dambiga gaysatay, inay bixiso magdhaw dhibaataadii midabtakoorka, oo naqa karta tan lagu magacaabo qalbidilka
- Xarunta gobolka ee u kuurgalaka, wargalinta iyo kaalmo qareen<sup>1</sup> ee loogu talagalay dadka lagu takooro sababo midab, qabiil, jinsiyada, ama diinta.

**Muddada**

Haddii ay jiraan arima deg deg ah Garsooruhu wuxuu soo saaraa wareegto, kadib warkuu



helo, haddii loo baahanyahay, wargalin aan qotta dheerayn. Markaas wuxuu ku tilmaamaa wareegtadiisa malinta dacwada uu galayo oo aan ka badnayn 15 maalmood, isaga oo u qabanaaya, u gubinta dacwada iyo wareegtada cida ay khusayso, waqti aan ka badnayn 8 maalmood. Dacwada marki laqaado, Garsooruhu wuxuu soo saaraa amar uu ku xaqiijinayo, wax kabadalaya ama rafacaya qaraaradii wareegtada ku soo baxay.



1 waqtiga soo saarka qoraalkan, Wali lama dhisin Xarunta Bobolka ee kor ku xusan

## WADDAN KA SAARID ESPULSIONI

### Dadkay Quseyso:

Warqada wadankasaarida waxaa saxiixa wakiilka dowlada ee magaaladaas (prefetto) marka qofka ajnabiga:

- uu soo galo wadanka talyaaniga si qarsoodi ah, islamarkaasna aan horey laga celin.
- Haddii uu ku nagaado wadanka in ka badan 8 beri laga bilaabo markuu soo galo, asagoo waydiisan fasaxa joogista wadanka (marka laga reebo haddii ay daahidaas sababtay arimo ka awood badan), haddii lagala noqdo fasaxii wadan joogista, ama uu ka dhacsan yahay in ka badan 60 maalmood, asagoo waydiisan cusboonaysiin.
- Haddii loo arko qof qatar ah oo lagu maleeyay inuu ku taxaluqo danbigalin ama uu ku nool yahay wuxuu ka helo dad dilis; ama haddii lagu eedeeyay dambiyo la xariiro kooxo tuugo ah ama wax u dhigma.

Dalkasaaridu waxay ku soo baxee wareegto sabableh waxaana loo hirgalinayaa deg deg, walow laga dacwoodo, waxaana lagu sugaa gacanta qofka ajnabigaa ayadoo la tilmaamaa sida looga dacwookaro. Haddi qofkaas uusan aqoonin afka talyaaniga, waxaa si kooban wareegtada loogu tarjumaaf af uu garo karo, taas addii aysan suuragal ahayn waxaa lagu qoraa midkow door bido afafka ingriiska, fransiiska ama ibaanishka.

Haddi dacwo ku socoto qofka waddanka laga saarayo, taliyaha boolisku (Questore) wuxuu ka codsanaa maxkamadu inay bixiso wax kamaqab (nulla-osta) oo la diidkaro kaliya haddi ay jiraan arima muhiim ah oo kiiska qofkaas la xirira. Haddii maxkamadu aysan ku soo jawaabin 15 maalmood gudahood waxay lamidtahay ayadoo ogolaatay (silenzio assenso).

Haddi qofka ajnabigaa uu ku nagaado waddanka 60 maalmood kadib dicitaanka ogolaashada joogista, isaga oo aan codsan cuboonaysinteeda, waxaa lagu amraa inuu waddanka uga baxo 15 maalmood gudahood laga bilabo marka wareegtada lagu salimo. Taliyaha boolisku (Questore) wuxuu amraa in si deg deg ah loo wado, haddii wakiilka dowladu (Prefetto) uu u arko si cadaan ah inuu qofkaas rabo inuusan fulin amarka, ee uu ka dhuunto. Si kastaba ha ahaatee, wareegtada dalkasaaridda waxaa lagu fulinayaa ayadoo ciidamada amaanku ay u wadayaan xudduuda.


### Difaacid.

Si ka hortag ah qofka wuxuu dacwad gaysan karaa maxkamada magaaladaas laga siiyey wadankasaarista 60 maalmood gudahood laga bilaabo markey warqadaas soo gaartey.

Haddi qofkaas lagu xukumdo inuu sii joogo xarumaha joogista ku meelgaaraka (centro di permanenza temporanea) dacwadiisa wuxuu u gudbinayaa maxkamada xukunkaas ridday.

Dacwada ka hortagga (ricorso) waxaa laga soo gudbi karaa qunsuliyadaha dibadda ee talyaaniga.

Qaraarka maxkamada rafcaan (appello) lagama qaado karo, laakiin waxaa loo dacwookaraa



Maxkamad sare (Cassazione)

**Ajnabiga waddanka laga saaro dib ugumasoonaqokaro 10 sano ka hor** haddi uu san kahelin fasax gaar ah Wasaaradda Gudaha: ciddii ku xad gudubta waxau mutaysanee xabis u dhaxeeya 6 bilood illa 1 sano, markalana waddanka ayaa laga saraa ayadoo garbaha laga socdo.

Wakiilka Dowladu (Prefetto) wareegtada dal ka bixinta, isaga oo tix galinaaya hab nooleedka qofka ajnabigaa intuu ku sugnaa waddanka, wuxuu ku tilmaami karaa waqti 10 sano kayar lakiin aan ka hoosayn 5 sano, dib ugu soo labashada waddanka talyaniga.

Wareegtada dal kabixidda ay soo saarto Wasaarada Guduhu, sababo ku salaysan nabadgalyada shacbiga ama wadanka awgood, waxaa looga dacwookaraa Maxkamada gobolka Lazio (TAR) ee saldhiggeedu yahay Roma.

## SOOGALIDDA SHAQO MADAX BANAAN INGRESSO PER LAVORO AUTONOMO

### Cidda ay khusayso

Dadka ajnabigaa ee deggan dibadda ee doonaaya inay qabtaan howla la xiriira warshadaha, xirfadaha, farsamada ama baayacmushtarka, ama dhisaan shirkad xooleed ama dadeed.

### Habka

Waxaa loo fidinaa fiisada soogalida shaqada madaxbanaan, kuna kooban caddadda soogalidda, ajnabiga dukumeentiga hoos ku xusan u geeysto qunsuliyadda talianiga:

- caddayn inaysan jirin wax u diidan bixitaanka shahadada hooyga ama ogalashada fasaxa lagama maarmaanka u ah ka howlgalka waddanka talyaaniga shaqada uu doortay;
- haqeejin inuu haysto dhaqaale ku filan howlgalkiisa oo lagasugo Hay'adda

bayacmushtarka<sup>1</sup> ee u xilsaaran deegaanka shaqada madaxbanaan laga qabanayo;

- wax-kamaqab (nulla osta) laga bixiyay xaafiiska booliska (Questura);
- dukumeeti la xirira inuu heli karo hoy u qalma;
- dukumeeti la xirira inuu heli karo lacag ka badan tan dadka kharajka caafimaadka lagadhaafo.

### Qunsuliyada talyaanigu waxay buxinee:


- dalkugal ayadoo timaaysa howsha ay la xiriirto;
- shahaado caddynaysa inuu hayto dukumeetiga looga baahanya sidu helo ogolaashada joojidda shaqada madax banana.

### Muddada

Dalkugalka waa:


- in la bixiyaa ama la diidaa 120 maalmood gudahood laga bilaabo codsiga waqtiga safaaraada la geeyay;
- wana in lagu soogalaa 180 maalmood gudahood, laga bilaabo waqtiga la bixiyay.

Ogolaashada joogista shaqada madax banan waxay soconee 2 sano waana la cuboonaysiikara.



## Qabashada howlaha madax banaan ee la xiriira ajnabiga jooga waddanka talyaaniga

Ruuxii ajnabiya ee horay u lahaa ogolashada joogida ee ka duwan midda shaqada madaxa banana (dalxxis, caafimaad, codsi quxuuti iwm) wuxuu ka codsakar xaffiska booliska u xilsaaran in loo badalo ogolaashada joogida. Arrintaas siday u hirgasho waxaa loobaahanyahay in qofka ajnabigaa inuu la yimaado dukumentiga dalkugalka shaqada madax banaan, waana inuu ka helaa caddayn Hogganka deegaanka shaqada oo qiraysa in codsigaas inuu ka midyay qaybta loogu talagalay soogalidda laxiriirta shaqada madax banaan oo sanadwalba la ogolaado.



1 Camera di Commercio di Firenze: Piazza dei Giudici 3, tel.: 055 27951

## SOOGALIDDA SHAQO XILLIYEEDKA INGRESSO PER LAVORO STAGIONALE

### Cidda ay khusayso

Looshaqeeyaha talyaaniga ama ajnabigaa ee si sharciya waddanka ku daggan iyo ururada oo u codsankara ximnaahooda oo doonaya inay qortaan dad ajnabigaa ee deggan dibadda ee doonaaya inay ka qabtaan shaqo-xilliyeed.

### Xaffisyada lala xiriirayo

Gobolwalba waxaa la dhisa L/H Xarunta barasaabka (Prefettura – Ufficio Territoriale di Governo) farsad ka hoowlan arimaha dadka ajnabiga (sportello unico per l'immigrazione) oo kormeerta howgalinta shaqaalaha ajnabigaa ee waqtigoodu xaddadanyahay iyo kuwa waqtigoodu uu dheeryahay.

### Habka

Ayadoo la tixgalinaayo caddadda ama qaybta soo galidda ee ku tilmaaman wareegta sanadeedka ama heshiisyo gar ah ee la xiriira dur durka shaqo xilliyeedka, waxaa looshaqayuhu u keensa karaa codsi magac wata, farsada guud ee ajnabiga ee gobolka deegaankiisa.

Farsada guud waxay u gudbinee codsiga xarunta shaqada ay khusayso, taasoo 5 maalmood gudahood ku hubinaysa haddi ay jiraan shaqala talyaniya ama ka tirsan midoowga yurub oo shaqo xilliyeedkaas qabakara.


Farsada guud ee ajnabigu waxay bixinee fasax 10 maalmood gudahood, laga billabo markay la xiriirtay xarunta shaqada ama 20 maalmood ka dib markay codsiga ka qabateen loo shaqeeyaha, waxayna dukumeetigaa u gudbinee, oo uu ku jiro nambarka canshuurta (codice fiscale), xaffisyada qunsuliyadaha, haddii ay surta gal tahay waxay adeegsanee khadka elektrooniga (via telematica).

Xaffisyada qunsuliyadaha waddanka uu dagganyahay ama uu u dhashay waxay bixinayaan, markay hubiyaan kadib, dal-kugal ayagoo tilmaamaa nambarka canshuurta.

**Waqtiga ugu yar oo lagu joogi karo ogolaashada joogidu waa 20 maalmood, kan ugu badanna waa 6 bilood.**

Ogolaashada soogalida waxaa gaar ahaan mudan, shaqaalaha ajnabigaa ee dib ugu laabta waddankooda, ogolaashada joogidooda sanadkii hore ee shaqo xilliyeedka hadday dhacdo, iyagoo ka horeeya shaqaalaha cusub ee aan waligood fiisa shaqo ku imaan waddanka talyaaniga.

Shaqaalaha shaqo-xilliyeedka oo ugu yaran labo sano xiriir u yimid waddanka shaqo xilliyeed,



waxaa loo ogolyahay, haddi shaqadiisu soo noqnoqonayso, fasax dhowr sanaa, oo ku eg 3 sano, waqtigeesuna u dhigmo kii la siiyay sanadkii ugu dambeeyay. Dal- kugalka la xiriira waxaa la bixinaa sanad walba.

Ogolaashada waa lagala noqonaa haddi qofka ajnabigaa uu xad gudbo sharcigaan.

## SOO GALID SHAQO CID KALE INGRESSO PER LAVORO SUBORDINATO

### Cidda ay khusayso

Shaqo bixiyaha talyaanigaa ama ajnabigaa ee si sharciya ogolaasho ku leh, degan talyaaniga, oo doonaaya inay heshiis shaqo lagalaan, shaqaalo ajnabiya ee degan dibadda.

### Xaafiisyada lala xiriirayo

Gobolwalba waxaa ka dhisan L/H Xarunta barasaabka (Prefettura – Ufficio Territoriale di Governo) farsada guud ee soogalootiga (sportello unico per l'immigrazione) oo kormeerta howgalinta shaqaalaha ajnabigaa ee waqtigoodu xaddadanyahay iyo kuwa waqtigoodu uu dheeryahay.

### Habka

Ayadoo la tixgalinaayo caddadda ama qaybta soo galidda ee ku tilmaaman wareegta sanadeedka Godoomiyaha Golaha Wasaarada, waxaa looshaqeeyuhu u keensa karaa, Farsada Guud ee ee soogalootiga ee gobolka deegaankiisa, ama saldhigga u ah shirkadda, ama mesha laga shaqaydoono:

- codsi magac wata oo wax-kamaqab (nulla osta);
- dukumeeti caddynaya habka dajinta shaqaalaha ajnabigaa;
- bandhigida heshiiska joogidda iyo ballamadiisa, oo ay ka midtahay ballanqaad inuu bixinayo loo shaqeeyuhu, kharajka dib ugu naqashada wadanki uu kayimid shaqaalaha ajnabigaa;
- balanqaad cadaynaya inuu soo gudbinaayo wixii isbadala ee ku yimaada xiriirka shaqada.


Haddii looshaqeeyuhu aqoon toos ah uusan u lahayn qofka ajnabigaa wuxuu codsan karaa, isga oo keenaaya dukumeentiga la xiriira heshiiska, hoyga iyo kharajka dib u naqashada, wax-kamaqab shaqo oo hal ama doowr qof oo ku dhigan, liisaska lagu diyaariyo qunsuliyadaha Talyaaniga, oo lagu xulayo sida ku xusan nidaamka cusub ee hirgalinta.

### Muddada

Farsada Guud ee Soogalootigu (sportello unico per l'immigrazione) waxay u diree codsiyada loo shaqeeyayaasha xarunta shaqada ay khusayso. Xarunta shaqadu waxay ku faafinee xarumaha kale ayadoo adeegsanee aalada Internetka iyo si kastoo suura gala.

Haddii aysan soo dalban shaqooyinkaas shaqaale Talyaniya ama ka tirsan Midowga yurub, 20 maalmood gudahood, xarunta shaqadu waxay u diree Farsada Guud ee Soogalootiga cadayn waayin, iyagoo la socodsinaa loo shaqeeyaha.

Farsada Guud, u badnaan 40 maalmood gudahood, waxay bixinee, xatta haddi aysan xarunta shaqadu aysan soo jawaabin 20 maalmood gudahood, wax-kamaqabka (nulla osta), kadib marka la maqlo taliyaha booliska, ayadoo la ilaalinaayo cadada ku dhigan wareegtada dowlada, waxayna dukumeetigaa u gudbinee, oo uu ku jiro nambarka canshuurta (codice fiscale),



xafiisyada qunsuliyadaha, haddii ay surta gal tahay waxay adeegsanee khadka elektrooniga (via telematica).

Wax-kamaqabka shaqo cidka waxaa lagu soo galikaraa ugu badnaan 6 bilood gudhood. Waqtigaas gudihiisa waa in qofka ajnabigaa waa inuu waydiiistaa dal-kugalka qunsulyada Talyaaniga ee wadanka uu deganyahay ama uu ka yimid, soonaa galaa wadanka talyaaniga.



## ISKADIIWAANGALINTA DOWLADA HOOSE<sup>1</sup> IYO WAAJIBAATKA MARTI GALIYAHA

ISCRIZIONE ANAGRAFICA<sup>1</sup> E OBBLIGHI DELL'OSPITANTE.

**Iskadiiwaangalinta dowlada hoose (comune) waxaa la suubiyaa:**

- Xilliga dhalashada: rajiistarka dowlada hoose ay dagan yihiin waalidka ama rajiistarka dowlada hoose ay dagan tahay hooyada hadii ay daganaanshaha waalidka kala duwan yahay.
- Ka soo badalasho daganaanshaha degmo kale ama dibadda, uu cadeeyo qofkaas qoraal ahaan, ayadoo la tixgalinayaa amarada ka yaala dadka aan meelna daganayn.<sup>2</sup>

Markey cusbooneysiistaan fasaxa daganaanshaha ama warqada daganaanshaha, Dadka ajnabiga ee ka diiwaangashan dowladda hoose, waxaa laga donaa inay cusbooneysiyaan cadeynta deegaanka caadiga ah 60 maalmood gudahood lagabilaabo cuboonaysiinta ogolashada joogista.

Dadaka deggan xurunta soo dhaweynka waa macquul in la diiwaan galiyo qofkii marti ku ah in ka badan 3 bilood, waase haddi ogolaashada joogidiisu ka badantahay 3 bilood. Waqtiga deegaanku wuxuu ka bilabanaa maalinta uu soo gudbiyo codsiga beddelka qofka ay khusayso.

Diwaangalinta, wax kabadelidda ama tirtirka deganaashada waxaa la ogaysiinayaa xaafiska boolika degmada. Bdalashada cinwaanka guriga waxaa la ogaysiinaa xafiiska boliska degmada 15 maalmood gudahood.


**Ka tirtirida diiwaanka wuxuu imaadaa:**

- Haddii uu qofku u guuro degmo kale ama dibada; ama qofkaan lahayn daganaansho joogta ee u guura dagmo kale.
- Haddii ay cadaato in la heli waayo qofkaas ka dib tarakoob guud ee dadweynaha ama qofkaas la heli waayo ka dib markii la raadiyey marar badan. Haddii uu qofku cusbooneysiwaayo cadeynta daganaashada caadiga ka dib mudo laga joogo 1 sano marka ay ka dhacdo ogolashada joogista ama warqada joogista. Qofka ajnabiga ah waa loo digaa laguna wargalinayaa inuu sameeyo 30-ka maalmood ee xiga.

WARQDADA AQOONSIGA, MARKII LAGA REEBO IS AF GARAD CAALAMI AH OO DAMBE KAASOO CADEYNAYA SIDAA SI KA DUWAN, SHARCI MA KUU SHINEYSO INAAD KU DHOOFTID AMA AAD SI JOOGTO AH U DEGANAATID ITALIA HADII AADAN LAHAYN OGOLAASHADA JOOGISTA.

**Wajibaatka martigaliyaha iyo loo shaqeyaha**

Cidkasta ee guri siisa ama martigaliso qof ajnabiya, ama waddanlaawaa, walow xigtadiisyahay, ama uu u shaqayo, ama uu wareejiyo hantida ama manaafacaadka dhismaha badadiyaha ama magaalada ee ku yaal dhulka talyaniga, waxaa qasab ku aha inuu qoraal ahaan



ugu gudbiyo, 48 saacadood gudahood, ciidamada amaanka.

Qoraalkaas waxaa lagu cadynaa haybata qoraha iyo qofka ajnabigaa ama waddanlaawahaa, tilmaamaha baasaboorkiisa ama dukumenti aqonsigisa, cinwaanka guriga lagu wareejiyay ama uu deganyahay, ama lagu martigaliyay ama uu ka shaqeyeyo iyo waxa sababay qoraalka. Ciddii ku xadgudubta amarkan waxaa lagu ganaxaa lacag u dhaxaysa 160 euro iyo 1100 euro.

1 Comune di Firenze, Ufficio Anagrafe – Via dei Leoni 5, Isniin illa iyo Sabti saacadaha: 8,30 -13,00; Khamiis saacadaha: 8,30 -18,30

2Fursadii deganaashada saldhiga ururada samafalka waa la rafacay.

## ISDIIWAANGALINTA DUGSIGA QASABKA AH ISCRIZIONE ALLA SCUOLA DELL'OBBLIGO

**Dadkey quseyso:**

Ajnabiga aan qaangaarin kuna sugan wadanka talyaaniga waxay xaq u leeyahayihiin waxbarashada xataa hadii aysan sharci lahayn sida ilmaha talyaaniga ee aan qaangaarin.

Waxaa la is qorikaraa sanadka hudhiisa marwalbaba.

Ilmaha ajnabigaa waxaa la dhaqaa amarada waxbarashada loogutalagalay ee la xiriira xaqa ay uleeyihiin adeeyada waxbarashada iyo inay ka qaybqaataan noolasha bulshada waxbarashada, ay kamidtahay amarada la xiriira talaalada qasabkaa, haddi laga reebo kuwa dhakhtarka ASL-ku uu dhaaf. Haddi talaalada laguqabtay dibadda, shahaadooyinka la xiriira waa in lagu tarjumaa afka talyaniga lagana sugaa qunsuliyada talyaaniga ee wadhanka lagu dhashay ama laga yimid.

Haddii uusan laheyn warqado aqoonsi ah ama warqadihiisa aysan dhameystirneyn ama ay qaldanyihiin waa lagu sii qori karaa dugsiga; taasna ma u ddidayso iney dhameystirtaan waxbarashadooda heerkasta.

Haddi aysan jirin dukumeeti aqoonsi waxaa la tix galinayaa haybta uu shheegtay ardagu markuu is qoraayay, magacaas ayuu shahaadada ku qaadanay.

**Habka**

Codsiga waxaa loo gaysanayaa dugsiga uu rabo inuu ajnabigaas aan qaangarin uu wax ka barto. Ilmaha ama dhalinyarta aan qaan gaarin ee ku qasban waxbaradha qasabka ah waxaa lagu qorayaa galaaska ku aadan da'dooda marka laga reebo hadii ay golaha macalimiinta u arkaan in lagu qoro galaas ka duwan.


Waa in la tixgaliyaa:

- Habka waxbarsheed ee wadanka uu ka yimid oo kkenikara in lagu qoro galaas kaduwan kan sanadkiisa
- La habsadaa garaadkiisa iyo heerkiisa aqooneed.
- Waxbarshada uu ku soo dhigtey wadankiisa.
- Shahaadooyin kale hadii uu heysto.

**Dugsiga xanaanada**

Codsiga waxaa loo gaysanayaa dugsiga xanaanada ee deegmada ay khusayso ama meesha ay daganyihiin waaridku. Haddi na codsado dugsiga ka duwan, waxaa la tixgalinaa haddi boos banaanyahay, taasoo aan qabayn galaasyada in la badiyo.

Isku qoridda iyo dhigashada dugsiga xanaanada waa lacag la'aan waxaana la iskudhigaa bisha janwari sida u cad wareegtada wasaarada waxbarashada.



## Ka qaybgalka caruurta roomkaa

Si loo qorsheeyo waxbarashada ilmaha roomkaa dugsiyada Allori, Cadorna, Montessori, Rodari, Bechi, Locchi, Niccolini, Fedi, Viani, oo horay uga qabqaatay ka qaybgalka caruurta roomkaa ee deggan xerooyinka Poderaccio iyo Olmatello, waxaa loogu talagaraa, u gu yaraan hal boos galaas walba.

Wax ka dhimidda ama ka dhaafidda dhiibidda kharajka dugsiga<sup>1</sup>

1 Arag qoraalka loogu talagalay

## GUURKA MATRIMONIO

### Dadkey quseyso

Dhamaan dadka talyaaniga iyo ajnabiga ee degmadaas, xataa hadii uusan ku lahayn deganaansho degmadaas ama uusan lahayn ogolaashada joogista.

### Xafiisyada lala xariirayo:

Xafiiska diiwaanka bulshada ee degmadda<sup>1</sup>-xafiiska naadinta (hadii uu midkood ku leeyahay deganaanshaha)

### Waraaqaha loo baahan yahay:

- basaboor aan dhicin ama dukumenti safar oo u dhigma lana aqoonsan yahay.
- Warqada ruqsada, oo lagala imaanayo:
  - a) qunsuliyada wadankiisa ee ku sugan Italiya, ayadoo laga soo sharciyeeynaayo<sup>2</sup> xafiiska wakiilka dowladda (prefettura)<sup>3</sup>
  - b) Ama waddanka la yimid, haddi sharcigu ogolyahay, wana in lagu tarjumo af talyaani lagana sugo qonsuliyadda talyaaniga ee waddankaas.

Warqada ruqsada (nulla osta) waa inay tilmaantaa inaysan jirin wax hortaagan guurkaa sida uu qabo sharciga waddanku, haybta, waqtigaiyo mesha dhalashada, jinsiyada, degenashada iyo hor banannimo. Hawenka la soo furey ama laga dhintey mudo ka yar 300 oo maalmood waa iney fasax kala yimaadaan maxkamada.<sup>4</sup>



Haddii qofku uusan aqoon af talyaaniga waa inuu gacan ka helaa turjubaan marka uu soo gudbinaayo codsiga naadada iyo xafladda guurka.

Qofkii deegaanleh ama ku nool talyaaniga, waxaa ku qassaba naadada guurkawana inuu keenaa shahadada dhalashada oolagu helikaro sida ku qoran qodobada a) ama b). Haddi warqadda ruqsada ay ku dhigantahay haybta waaridka looma baahna shahaadada dhalashada.

Logama baahna sugitaan, shahaadada dhalashada e ku dhiga foomaka caalamigaa (afafbadne), oo laga bixiyay waddankuu ka yimid, haddi dowladaasi ka qaybgashay heshiiska caalamigaa ee arintaas la xiriirta.

**Hadii uu qofku uu yahay qaxooti wuxuu ka sameynayaa dukumintiyadaas xafiiska ACNUR.**

Xafladda guurka dowlada hoose, wuxay ka dhacee, maalinta balanka, guruga degmada waxana qabanaya Sargaalka xafiiska guurka (dhiinsiga ama wakiilkiisa), ayadoo ay joogaan labo marqaati, qarababa ha ahaadaanee, turjubaan (haddi arrosku ajnabiyahay afka talyaanigana aysan aqoonin).



**Ogolaashada joogista ee lagu bixiyay guurka dartiis waa la rafacaa haddi la habsado in si dhab ah aysan iskula noolayn, haddi aysan ilmo ka dhalan.**

1 Degmada Firenze: Ufficio di Stato Civile, Palazzo Vecchio, P.za della Signoria, stanza n.4 dabaqa hoose, sacadaha 8.30 / 13.00, Isniin illaiyo sabti, tel.: 2768276 – 2768370.

2 waxaa ka reeban sugitaanka waddamada hoos ku xusan: Belgio, Cipro, Danimarca, Francia, Gran Bretagna, Grecia, Irlanda, Jugoslavia, Liechtenstein, Lussemburgo, Norvegia, Paesi Bassi, Portogallo, Rep. Ceca, Spagna, Svezia e Turchia.

3 Prefettura di Firenze: Via A. Giacomini n.8, dabaqa 2°, saacadaha 9.00 – 11.00, laga reebo sabatiga.

4 Tribunale di Firenze: P.za San Firenze, Cancelleria Volontaria Giurisdizione, dabaqa 3°, Isniin illaiyo sabti, sacadaha 8.30 – 12.30

## OGOLAASHADA JOOGISTA SHAQO CID KALE PERMESSO DI SOGGIORNO PER LAVORO SUBORDINATO

### Cidda ay Khusayso

Dadka ajnabigaa ee leh Dal-Kugal (visto d'ingresso) shaqo cidkale.

### Habka

Qofka ajnabigaa 8 malmood godahood waa inuu tagaa, isagoo la socda looshaqeyyaha, farsada guud ee ku hoowlan arimaha dadka ajnabiga (sportello unico per l'immigrazione) ee bixisay wax-kamaqabka, siduu u saxiixo heshiiska joogista (contratto di soggiorno), oo halkas lagu kaydinayo, kobina waxa farsadu u diree qunsuliyadda iyo xarunta shaqada ay khusayso.

### Waajibaatka loo shaqeyyaha

Gobolwalba waxaa ka dhisn L/H Xarunta barasaabka (Prefettura – Ufficio Territoriale di Governo) farsad ku hoowlan arimaha dadka ajnabiga (sportello unico per l'immigrazione) oo kormeerta howgalinta shaqaalaha ajnabigaa ee waqtigoodu xaddadanyahay iyo kuwa waqtigoodu uu dheeryahay.

Qofka ajnabigaa 8 malmood godahood waa inuu tagaa xaafiska booliska siduu u helo ogolaashada joogista (dukumeentiga loo bahanyahay ka fiirso qodobka la xiriirta).

Waqtiga ogolaashada joogista shaqo cid kale


Waqtiga ogolaashada joogista shaqo cidkale wuxuu la egyahay kan heshiiska joogista, kaman dheeraa karo

- Hal sano, haddii heshiiska shaqo ee cidkale waqtigiisu xadadanyahay;
- labo sano, haddii heshiiska shaqo ee cidkale waqtigiisu dheeryahay ama shaqadu madax banaantahay;

### Cusboonaysiinta ogolaashada joogista

Wxaa laga codsanaa taliyaha booliika gobolka ee ajnabigu dagganyahay:

- 90 maalmood ka hor intaysan dhicin ogolashaada joogista ee shaqada la xiriirta heshiiska shaqo cidkale ee waqtigiisu dheeryahay;
- 60 maalmood ka hor intaysan dhicin ogolashaada joogista ee shaqada la xiriirta heshiiska shaqo cidkale ee waqtigiisu xadadnyahay;



### Maxaa dacaya haddi shaqaaluhu shaqo la'aan noqdo?

Haddi qofka ajnabiga shaqo la'aan noqdo (rukhso kaligiisa ama guud ama isagu shaqada ka tago), shirkadda howgalisay waa inay oqaysiisaa hogaanka gobolka shaqada, 5 maalmood gudahood, waqtiga shaqo la'aanta kadib, si loogu dhigo liiska shaqo doonka looguna fidiyo gar gaar dhaqaale. Hogganka gobolku wuxuu ku qora liiska shaqo doonka, waqtiga uga haray ogolaashada jogistiisa, waqtigaasu kama yaraakaro 6 bilood, haddi laga reebo shaqo xilliyeedka.

Haddi qofka ajnabigaa uu xaq u leeyahay inuu waddanka joogo, waqti ka dheer kan ku qoran oqlashada joogistiisa, xaafiska booliku wuxuu u cusboonaysiina ogolaashada joogistiisa 6 bilood laga bilaabo marka lagu qoray liiska shaqo doonka, waase haddu sidaas codsado.

### Shaqaalaha naafadaa ama quxuutiga

Haddi qofka ajnabigaa ee waddanka ku jooga ogolaasho shaqo ama sabab u ogol shaqo cidkale ee la cadeeyay inuu naafayahay, qoritaankiisa liiska gaarka u ah naafadu wuxuu la midyahay kan liiska shaqo doonka. Lisaskaas waxaa lagu diyaarinaa xafiisyada shaqada ee gobolka waxaan ku jira dadka quxuutigaa ee shaqo la'aanta doonaayana inay helaan shaqo u dhiganta kartidooda.

### Xuquuda daryeelka iyo xanaanada bulshada hadii la celiyo


Haddii dib loogu celiyo wadankiisa qofka ajnabigaa wuxuu leeyahay xuquuda daryeelka iyo xanaanada bulshada ee u bislaatay, waana ka fa'iidayaan kara waloow u jiro heshiis is waydaarsi labda waddan (accordo di reciprocità) marka la gaaro waqtiga sharciga ku xusan, waa markuu jirsado 65 sano.

## OGOLAASHADA ISU IMAADKA QOYSKA PERMESSO SOGGIORNO PER MOTIVI FAMILIARE.

### Dadkey quseyso:

Waxaa kale oo la siinayaa ogolashada joogista usu imaadka qoyska, qofka ajnabigaa ee ku yimid dal-kugalka sababaha qoyska, ama soogala isaga oo la socdo qaraabo Talyaaniya mooyaane

- Ajnabiga si sharciya waddanka ku jooga ugu yaraan hal sano ee ku guursada Talyaniga xaas talyaaniya ama ka tirsan Midowga Yurub, ama ajnabiya ee si sharciya ku jooga waddanka
- Ajnabiga qaraabadaa ee si sharciya ku jooga, oo xaq u leh inuu la midoobo qof Talyaaniya ama ka tirsan Midowga Yurub, ama ajnabiya ee si sharciya ku jooga Talyaaniga. Markaas waxaa loo wareejinaa ogolaashada joogista usu imaadka qoyska. Wareejinta waxaa la codsan karaa sanad gudihii laga bilaabo dicida ogolaashadi joogista hore. Haddi qofkaasi qaraabo u yahay cid qaxooti ah looma bahna inuu horay u lahaado ogolasho joogis
- Waarid ka ajnabigaa ee dhalay, xatta guur la'aan, caruur talyaaniya e degan wadanka talyaaniga. Waridkaas wuxuu leeyahay ogolashada joogista qoyska, xatta haddi sharci daro uu ku joogo waddanka, waase hadii aan laga wareejin xaqa waaridnimo sida uu qabo sharciga Talyaanigu
- Ajnabiga la nool qaraabadooda illaiyo abtiriska afaraad ama xaaska Talyaaniga ah.



### Maxay fasaxee ogolashada joogista usu imaadka qoysku?

- Adeegvada xananada
- Dhigashada dugsiyada iyo barashada xirfadaha
- Diwaangalinta liiska shaqalaawayaasha
- Sahaqada cidkale ama tan madax banana, haddii da'da sahqada la jiro

### Waqtigeedana?

Ogolashada joogista usu imaadka qoysku waqtigeedu wuxuu ku jaango'anyahay kan xigtada ajnabigaa oo leh dukumeetiga looga banyahay isu imaadka qoyka, waxaana lala cusboonaysiinaa ogolaashada xigtada.

Ajnabiga u imaanaya xigta Talyaaniya ama ka tirsan Midowga Yurub, ama ajnabiga leh warqada joogista, waxaa la siinaya warqada joogista.

### Maxaa dacaya haddii uu dhinto qofka xigtadaa, ama la kala guuro ama la isfuro?

Mararkaano kale, ama owlaada aan heli karin warqada jogista, markuu 18 sano jirsado, ogolashada joogista waxaa loo wareeji karaa ogolaasho shaqo cidkale, mid madax banaana ama mid xag waxbarasho, haddii da'da sahqada la jiro.

### Ogolaashada joogista isu imaadka qoyska ee lagu bixiyay guur ka dhacay Talyaaniga ma la rafaicikaraa?

Ogolaashada joogista ee lagu bixiyay guursasho qof Talyaaniya ama ka tirsan Midowga Yurub, ama ajnabi si sharciya wadanka ku dagan, waa la rafaca haddi la habsado in si dhab ah aysan iskula noolayn, haddi aysan ilmo ka dhalan.

## DARYEELKA BULSHADA PROTEZIONE SOCIALE

### Dadkey quseyso:

Qofka ajnabiga ee ku sugan jirdilis ama halis u ah dhiigmiirasasho, qofkaas loo maleyn karo inay qatar gasho nabadgalyadiisa asagoo ka baxsanaaya xaladaas uu ku sugan yahay.


### Xafiisyada lala xariiraya:

Bixidda joogida ku salaysan daryeelka bulshada waxaasoojeedikara:

- Hay'adda adeega bulshada ee magaaladaas ama ururada, hay'adaha, iyo wixii la mid ah ee ku qoran liiska xafiiska raiisal wasaaraha, qabybta arimaha bulshada, kuwaasoo sharci u qaba iney fuliyaan qorshayaal caawineed iyo daryeelida bulshada ajnabiga (markaas waxaa waa dhiibi karaa taliyaha booliska hadii ay la qumanaadan taloyinka loo soo jeediyay);
- Xeer ilaaliyaha qaranka hadii ay jirto dacwo ku salaysan jirdilis ama dhiigmiirsho gaartey qofkaas ajnabiga. Xaafiiska Booliska, markuu helo talada, hubiyana inay jiraan dhibaatooyinka la soo hor dhigay, wuxuu bixinaa ogolaashada joogista bani'aadannimo


### Waraaqadaha loo baahan yahay:

- Ra'yiga xeer ilaaliyaha qaranka, hadii ay jirto dacwo.
- Barnaamishka caawineed iyo dhaxgalka bulshada ee quseysa ajnabigaas, waafaqsanna sida guddiga wasaaraduhuu uu go'amiyay;
- Inuu ogolaado, fuliyana barnaamijkaas qofka ajnabiga ah; xog ogaalna u ahaado waxa soo gaari kara hadii uu joojiyo barnaamijkaas ama uu sameeyo wax ka



hortagaya ujeedada barnaamijkaas.

- Ogolaanshaha hawlaha la xariira barnaamijkaas qofka mas'uulka ka ah xurunta uu barnaamishkaas ku fulayo. Taliyaha booliska ayaa qiimeynaya haddii uu jiro wax qatar ku ah ajnabigaas.



ee xaafada codsi ay ku lifaaqanyahay cadaynta dakhliga sanadwalba waqtiga la go'aamiyay. Waa in lagu tilmaama xaalada dakhliga sanadkii hore ee qofkasata ee qooyksa ka mida, oo ka kooban waaridka iyo owlaada, yar iyi wayn, la masruufo, laguna daro dakhliga si kastaba ku soo gala ximnaha qooyksa, oo ay jiraan xatta jeegaga quudinta owlaada. Dakhliga la tixgalinayo waa isku darka dakhliyada ximnaha qooyksa oo laga gooyo kharajka daryeelka iyo xanaanada ee qassabka ah.

Sida loo qiyaaso dakhliga madax madaxa sanadkii (reddito pro-capite), waxaa loo qeeybinaa soo galka qooyksa oo dhan ximnihiisa.

#### Guddiga arimaha gaaraka

Waxaa loo soo gudbinaa Guddiga loogu talagalay, codsiga reebida lacag bixinta, sababo caafimaad am daqaalo darro dartood, laguna soo lifaaqay cadaynta loo bahanyahay, lana soo marsiinaayo mas'uuliinta u qaybsann ee Dowlada Hoose.

- Dakhliga madax madax ee u dhaxeeya Euro 3.356,97 iyo Euro 4.131,66 iyo xaalada ay ogtahay Hay'ada Adeega Bulshada: soo gudbinta codsiga qiraaya xaalada dakhliga o la soo raaciyay war bixin la xiriirta dhibaataada qooyksa soo fool saartay.
- Dakhliga madax madax ee u dhaxeeya 0 iyo Euro 4.131,66 iyo xaalada aysan ogayn Hay'ada Adeega Bulshada: soo gudbinta codsiga qiraaya xaalada dakhliga o la soo raaciyay war bixin la xiriirta dhibaatooyinka qooyksa soo fool saartay oo lagu soo lifaaqay cadayn hay'ado iyo Xafiisyada dowlada o sugaaya jirida dhibaataada.

#### Waydiisashada dhimida lacagta miiska

Dakhliga madax madax ee u dhaxeeya Euro 5.422,80 iyo Euro 6.455,71 iyo xaalada aysan ogayn Hay'ada Adeega Bulshada: soo gudbinta codsiga qiraaya xaalada dakhliga o la soo raaciyay war bixin la xiriirta dhibaatooyinka qooyksa soo fool saartay oo lgu soo lifaaqay cadayn hay'ado iyo Xafiisyada dowlada o sugaaya irida dhibaataada. Cadaynta Hay'ada Adeega Bulshada ee la socota xaalada qooyksa, waxaa waydiisanaya xaafiska dugsiga.

Hogaanka Waxbarashada: Via Nicolodi, 2, Firenze – tel.: 055 2625606, Isniin,arbacoo.iyo Jimce – saacadaha 9.00 – 13.00

### DAL-KUGAL IYO OGOLAASHDA JOOGISTA EE XAG WAXBARASHO

VISTO D'INGRESSO E PERMESSO DI SOGGIORNO  
PER MOTIVI DI STUDIO

#### Dadkey quseyso:

Way waydiisan karaan dal-kugal xag waxbarasho, ajnabiga deggan dibada ee haysta shahaado dugsiga sare ka dib 12 san oo waxbarasho ah.

#### Xafiisyada lala xiriirayo

Codsiga fiisaha waxaa la waydiisanayaa qunsuliyada talyaaniga ee ku taal wadankaas ama wakiilka talyaaniga ee qaabilsan arimaha deegaanka qofka ajnabigaa.

#### Habka loo codsanaayo:

Codsiga ku siiqorka (prescrizione) waxaa la waydiisanayaa qunsuliyada talyaaniga ee ku taal wadankaas ama wakiilka talyaaniga ee qaabilsan arimaha deegaankaas, waqtiga xadidan ee sanadkaas la qorsheeyay (wargalinta kala xiriir qunsuliyada talyaaniga).

Saldhiga qunsuliyadaha talyaniga waxaa diyaar ku ah liiska Jaamacadaha talyaaniga



#### Ogolaashada jogidaani

- Waqtigeedu waa 6 bilood waxaana la cusboonaysiikaraa hal sano, ama in kabadan haddii caddaladu u baahantahay;
- Waa la rafacaa addii la joojiyo barnaamijka ama ay soo baxdo dhqanxumo ay yilmaameen xer hayaha, ama, hadday khusayso, hay'adaha adega bulshada ee degmada, ama haqiijiyo taliyaha boolisku;
- Waxay ogolaanee in la helo adeegyada muhiimkaa iyo waxbarashada, iaku rorida liiska shaqa laawayasha iyo u ahaqaynta cidkale, haddii da'deeda la gaaro;
- marka ay dacdo, haddi cidday khusayso ay shaqo waddo, waa la dheraynaya ama waxaa lagu jaan gooynaa waqtiga shaqada;
- Waxaa kale oo loo wareegi karaa ogolaashada waxbarashada haddii qofku uu dhigto dugsiga.

Ogolaashada joogista bani'aadannimo (daryeelka bulshada) waxaa kale oo la sii karaa, marka xabiska laga saaro, haddi sidaas ay soo jeediyaan Xeer ilaaliyaha ama Garsooraha dabagalka ee maxkamadda kuwa aan qaan gaarin, qofkii ajnabiya ee dhamaystay waqtigisii, dambiya uu galay intii uu san qaangaarin sabatood, haddii uu muujiyo inuu ka qaybaqaadanayo barnaamij la xiriira daryeelka iyo ku darsanaanta bulshada.

### DHIMIDA AMA REEBIDA BIXIDA LACAGTA ADEEGA MIISKA DUGSIGA RIDUZIONE O ESONERO DAL PAGAMENTO DEL SERVIZIO DI REFEZIONE SCOLASTICA

Codsiga ka fa'ideesashada qiimaha (dhimida lacagta, reebida bixidda lacagta) waa in la waydiistaa sanadwalba mas'uuliinta dowlada hoose ee xaafadaas ama xafiisyada hogaanka waxbaeashada.<sup>1</sup>

Haddi ardagu uu u baahanyahay cunta gaar ah waa in la keenaa sanadwalba shahadada la xiriirta ee dhakhtarka. Cundaas gaar kaa waxaa la helaa marka shahaadada lakeeno kadib, taasoo tilmaameeysa cudurka iyo quutka usan cuni karin ardagu.

**Qooyksa caruurta badan ay ugu jirto dugsiga, waxaa laga dhimaa 20% qiimaha la bixiyo uu ku jiro qiimaha dhiman, laga bilaabo ilmaha labaad.**

Reebida lacag bixinta

Waxaa loo ogolyahay qooyksa usan dakhligoodu uu san ka badnayn sandkii Euro 3.356,97 oo laga gargaaro xaramaha adeegyada bulshada ee xaa. Waaridku waa inuu u keenaa mas'uuliinta dowlada hoose ee xaafada codsi ay ku lifaaqanyahay cadaynta dakhliga sanadwalba waqtiga la go'aamiyay. Cadaynta Hay'ada Adeega Bulshada ee xaafada, waxaa waydiisanaya xaafiska dugsiga.

#### Dhimida lacagta miiska

Waaridku waydiisana dhimada lacagta miiska, waa inuu u keenaa mas'uuliinta dowlada hoose

maadooyinka laga barto ee u haaya boos gaar ah ardayda ajnabigaa.

Ardagu waa inuu ku tilmaamo codsigiisa hal maado (corso di laurea) iyo jaamacadad uu isku qoraayo.

## Dokumentiyada looga baahanyahay

### 1) Hahaada Waxbarshada

- Shahaadada dugsiga sare oo orjinaal ah ama shahaado u dhiganta si sharci ah (koobi lama ogola)<sup>1</sup>. Shahaadada waxaa lagu lifaaqaa turjubiin af tayaniya ee laga sugay qunsuliyada talyaaniga ee halkaas. Wakiilka talyaaniga ah ee wadankaas ayaa u soo celinaayo ardeydaas ay quseyso dukumintiyadooda orginaalka ee sharciyeysan kuna lifaaqan cadeynta qiimahooda, asagoo u gudbinaayo jaamacada ee uu ardaygu doortay sawirada waraaqahaas oo tasdiiqan.
- Ardayda ka baxaysa dugsiga sare xilliga kulaylaha sanadka socda, codsiga waxay ku so lifaaqaayaan cadayn dugsi dhigasho, ayagoo dib ugu keenaaya qunsuliyada talyaaniga shahaadada loo bahanyahay (shahadada orijinaalka ama cadayn u dhigmata) intuusan dhicin waqtiga lagu talagalay.
- Ardada ka yimid wadamada jamacadohoda si loogalo loobaahanyay in la gudbo imtixaan gaar ah, waa inay keenaan shahaadada dugsiga sare iyo shahaado cadeynaysa inay ku baaseen tartanka u qalmida jaamacada ee wadankooda.

Haddi ardada ku xusan qodobada b) iyo c) aysan u suuragalin qunsuliyada talyaaniga inay usoo gudbiyaan jaamacadaha talyaaniga, waqtigii loogu talagalay, dhamaytirka dukumeetigii horay looga qabtay ku meelgaar ahaan, waa loo ogolyahay imtixanka inay galan si kumeelgaar ah. Qunsuliyadaha talyaaniga, si kastaba ha ahaatee, arimahan wixii la xiriira waa inay si toos ah igu soo gudbiyaan, xatta fakis ahaan, jamacadaha magacyada ardada kabaxdayan dugsiga sare (kayska b), iyagoo tilmaamaya dhichaha ay qaateen natiijada imtixaanka u qalmida galidda jaamacadaha waddankooda (kayska c).

Haddi waqtigii loogu talagalay sanadwalba dukumeetiga loo baahanyahay aysan imaan, imtixaanka lagalay ku meel gaar ahaan waa wax kama soo qaadaan.

- Labo sawir oo midkoodna laga soo tasdiiqay qunsuliyada talyaaniga ah ee ku sugan wadankaas ama wakiilka talyaaniga ah ee u qaabilsan arimaha wadankaas.
- Dukumeenti la xiriira waxbarasho kale oo heer jaamacadeed ee dibadda oo aan dhamaystirnayn, haddii la waydiisanayo dhigashada kulliyad la soo gaabiyay. Waa in lakeena dukumeentiga hoos ku xusan:
  - Shahaadooyinka imtixannada la gudbay ee jaamacadda ajnabigaa oo lagu tajumay afka talyaaniga lagana hubiyay qunsuliyada talyaaniga ee halkaas;
  - Nuxur tifaftiran ee maadooyinka la qaatay, loona tarjumay sida kor ku xusan.

### Bixidda dal-kugalka

Dadak aan ka tirsanayn midowga yurub waxaa la siinayaa dal-kugal xag waxbarasho oo u ogolanaysa inay galaan imtixaanka aqbalka dhigashada jamacada sanad dugsiyeedka soo socda, laga bilaabo, tilmaan ahaan, bisha julaay<sup>2</sup> haddii lagu daro liiska ardeyda mudnaatey in laga qaado imtixaanka galitaanka jaamacada (ama loo ogolaado kumeelgaar ahaan) Kuwa shahaadada dugsiga sare qaata sanad dugsiyeedka socda, waxaa la siinaa dal-kugal markay soo dhamaytiraan dukumeetiga loo baahanyahay oo ay ku jirto shahaadada dugsiga sare iyo/ama shahaadada u qalmidda galidda jaamacadda.

Markay codsanayan dal-kugalaka, ardaydu waa inay haystaan:



- Balanqaad awoodiisa dhaqaale (nooca dukumeetiga loobahanyahay kala xiriir qunsuliyadda talyaaniga);
- caymiska caafimaadka iyo jiiifka isbitaalka (nooca dukumeetiga loobahanyahay kala xiriir qunsuliyadda talyaaniga).

### Ogolaashada joogista

Ardaygu markuu talyaaniga soo galo 8 maalmood gudahood waa inuu la xariiraa xafiiska booliska aagga uu dagayo, waydiistanna ogolashada joogida xag waxbarasho. Haddi ardagu rabo magaalo kale dago (barashada luqada talyaaniga), waa qassab inuu tagaa 15 maalmood gudahood xafiska booliska magaladaas, siduu u cadeeyo badalashada hooyga. Ardaydu marka jaamacadda lagu qoro kadib, si kastaba ha ahaatee intaysan ka dhicin ogolashad joogista waa inay ka codsadaan xaafiska booliska degmadda in loo dheereeyo sanadka dhan ogolaashada joogista.

Codsiga fiisaha waxaa la waydiisanayaa qunsuliyada talyaaniga ee ku taal wadankaas ama wakiilka talyaaniga ee qaabilsan arimaha deegaankaas, waqti xadidan ee sanadkaas ee uu qorsheeyo wasaarada arimaha dibada (sida caadiga ah inta u dhaxeysa april iyo maajo). Laga bilaabo agoosto ardeygii lagu daro liiska ardeyda mudnaatey in laga qaado imtixaanka galitaanka jaamacada wuxuu waydiisan karaa qunsuliyada talyaaniga asagoo la imaanaya dukumintiyada looga baahan yahay ee ku saabsan awoodiisa dhaqaale iyo caymiska caafimaadkiisa: fiisaha ku soo galitaanka wadanka xag waxbarasho si uu u sameyo imtixaanka galitaanka jaamacada. Markuu talyaaniga soo galo 8 beri gudahood waa inuu la xariiraa xafiiska booliska si uu u waydiista fasaxa joogida xag waxbarasho. Ardayga markuu imtixaanka uu ku gudbo wuxuu qaadanayaa fasaxa joogida ee xag waxbarasho.

**Ogolaashada joogida xag waxbarasho lama cusbooneysiinayo hadii ardeygu uusan ku gudbin ugu yaraan 2 imtixaan sanddugsiyeed walba<sup>3</sup>.**

### Imtixaanka jamacad galidda

Ardayga ajnabigaa si loogu ogolaado inuu wax kabarto kulliyadaha jamadaha talyaaniga, waa inay ku gudbaan imtixaanka aqoonta afka talyaaniga iyo, kulliyadaha qaarkood imtixaanka qassabka ah si loodhigto<sup>4</sup>.

Dadka imtixaanka galaaya waa inay la yimaadaan dukumeentiga aqoonsiga ee hoos ku xusan:

- Baasabooh leh dal-kugalka waxbarashada
- Ogolaashada joogista.

Dadka ajnabigaa ee ka yimid waddamada jaamacadahoda ay galikaran “tira go’an” kaliya (numero chiuso) waa inay gudbaan labo imtixaan oo kala duwan: kan aqoonta luqada talyaaniga iyo inay u tababaranyihiin la socoshada waxbarashada ay doorteen.

### Ciddi aan ku gudbin aqonta luqada talyaaniga ma geli karto imtixannada kale.

#### Natiijooyinka imtixaanka jamacad galidda


Waxaa la gu dhajinaa xoghaynta ardayda ajnabigaa ee jamacadda liiska (kulliyad walbaba mid gaar ah) ciddii gudubtay.

Jamaacad walba waxay udiiree M.I.U.R.<sup>5</sup> tirada boosaska banaan, si cidii ku gulaysata imtixaanka lakiin laga buuxiyay kulliyadda ay codsatay ay u gaystaan codsi

- dhigashada kulliyada kale oo u dhigmata oo isla jamacaddas ah (waase haddii shahaadadisa dugsiga sare lagu gali karo kulliyadaas);
- u badalashada jaamacad kale oo laga dhiganaayo kulliyadii la dalbday ama mid u dhigmata. Haddaba markaas waxaa codsy loo godbinaa Raktarka Jamacaddas

iyu Raktarka saldhigga imtixaanka oo bixidoona cadaayn godbinta imtixaanka iyo dhibcihi lagu gudbay.

Arday walba wuxuu keensa karaa hal codsi oo kaliya



### Ardayda boos la'aantaa

Ardayda imtixaanka ku gudubtay lakiin boos aan ka helin kulliyad kale ama jaamacad kale, waa inay ka baxaan waddanka talyaaniga marka ay dhacdo ogolaashada joogista ee waxbarashada, haddi aysan lahayn midkale oo u golaanaysa si sharciya inay waddanka ku joogaan.

Ardayda boosla'aantaa waxay dib ula laaban karaan wixii dukumeetiya ay horay usoo qadbiyeen, L/H Xoghaynta Ardada Ajnabiga.

### Isku qoridda ardada ajnabiga ee ku daggan si saharciya talyaaniga

Ardada ajnabiga (Midowga Yurub iyo kuwa kale) iyo quxuutiga ee haysta warqada joogida, ama ogolaashadajoogida xag shaqo cid kale ama xag shaqo madaxbanaan, xag qoyseed, xag magangalyo siyaasadeed, xag bani'aadannimo, xag diineed ama ajnabiga dagan si sharci ah, ugu yaraan hal sano, wadanka talyaaniga ee haysta shahaado dugsi sare oo laga qatay wadan kale<sup>6</sup> ama talyaaniga gudihisa, waxay si toos ah u gaysanayaan codsigooda Xoghaynta Ardada Ajnabiga ee Kuliyadda ay doorteen. Ardadaan logama baahna imtixaanka luqada talyaaniga.

Dadka ajnabiga, meel kastaba hadda ganaadaanee, ee haysta shahaadada dugsiyada sare ee talyaniga ee dibadda ku yaal, ama dugsiyada ajnabiga ama calamigaa ee ka furan talyaaniga ama dibadda, oo uu ka dhaxeeyo heshiis labada dinac ama amar gaar ah oo buuxiya wax yaabakha looga baahanyahay soo galidda talyaaniga xag waxbarasho, waxay si toos ah u gaysanayaan codsigooda Xoghaynta Ardada Ajnabiga ee Kuliyadda ay doorteen.

Ogolaashada joogista xag waxbarasho ma la dheereyn karo in ka badan 3 sano in ka badan sanooyinka loogu talagalay qaybta uu baranaayo; lakiin waa loo sii dheereyn karaa hadii uu rabo inuu sii wato waxbarashada heer taqasus ama cilmi baaris ah, ayadoo loo cusbooneysiinayo sanadkasta waqtigaas uu wado cilmi baarista ama taqasuska.

1 Shahaadada dugsiya sare waa inay ahaataa mid lagu gali karo Jamacadda Waddankaas, waqtiga waxbarashada dugsiyada hoose-dhexe-sare uusan ka yarayn 12 sano. Ardayda ka timaada waddamada waqtiga waxbarashada dugsiyadooda u ka yaryahay 12 sano waa inay keenaan, haddi ay isku qoraayaan jaamacad talyaaniga, shahaadada dugsiya sare ee orijinaal ah iyo cadaayn la xiriirta inay ku gudbeeb imtixaanada sanadka koobad ee jamacadda waddankooda, haddi waqtiga waxbarashada dugsiyadoodu u yahay 11 sano, ama 2 sano, haddi waqtiga waxbarashada dugsiyadoodu u yahay 10 sano.

2 Waqtiga ugu dambeeya ee dukumeentiga la keeni karo kala xiriir Qunsuliyada Talyaaniga ee waddankaad deggantahay.

3 Sabab aad u culus ee caafimaadka ama arimo kale ee cad dartood ardayagga waa loo cusbonaysinaa addii uu ku gudbo xatta hal imtixaan.

4 Wargalinata L/H: Xoghaynta Ardada Ajnabiga, Piazza S. Marco n.4, Firenze, tel. 0039 055 2757229 – fax 055 275768. E-mail: [ustr@adm.unifi.it](mailto:ustr@adm.unifi.it). maalmaha: Isniin, Arbaco iyo Jimco: Saacadaha: 9.00-13.00; Talaado iyo khamiis saacadaha: 9.00-10.30.

5 Ministero dell'Istruzione, dell'Università e della Ricerca.

6 Sahadada dugsiya sare waa in lagu tarjumaa afka talyaaniga laguna soo lifaaqaa cadaayn qiimaha ay ka leedahay halkaas oo ay bixisay Qunsuliyadda Talyaaniga ee qaabishan dhulkaas.



## DAL-KUGALAKA IYO OGOLAASHADA ISU IMAADKA QOYSKA VISTO D'INGRESSO E PERMESSO PER MOTIVI FAMILIARE

### Dadkey quseyso:

Waxay xaq uleeyihiin inay helaan ama lahaadaan midnimada qoyska dadka ajnabiga ee haysta haysta warqadda joogidda ama ogolaashada joogida wadanka in aan ka yareyn hal sano, kuna salaysan xag shaqo cid kale, xag shaqo madaxbanaan, magangalio, waxbarshooma sababo diineed.

### Dal-kugalka sababaha qoyska waxaa loo codsa karaa

- Xaaska hadan si sharciya aan loo kala guurin;
- ilmihisa aan qaan gaarin uu mas'uulka ka yahay, xatta haddi midkood dhalay ama aysan ku dhalan guur, oo aan xaas ehayn ama si sharciya aan loo kala guurin haddii waridka kale ogolaasho laga helo, haddii uu noolyahay;
- ilmihisa qaan gaarka ah uu mas'uulka kayay, oo aan iku filnayn arin caafimaad awgeed oo ka dhigtay cuuryaan cagalaaban;
- waalidkiis ee uu masuul ka yahay, haddii aysan la joogin owlaad kale waddankiisa ama dhulkow ka yimid;
- waaridka da'diisu ka badantahay 65 sano, oo owladiisa kale aysan wax u tarikarin, sabab culus ee caafimaad aawgeed.

### Waxaa kale oo la ogolyahay


- dal-kugalka isu imadakaqoska waarirka u imaanaaya ilmihisa aan qaann gaarin ee si sharciya ku jooga waddanka talyaaniga, waxaana qassab ku ah inay layimadaan dukumeetiga looga baahanyahay (hoy lahaasho iyo dakhliku filan) isu imaadka qoyka, hal sano gudihisa laga bilaabo markuu soogalay Itaalia;
- soogalidda ayadoo lala socdo qaraabo Talyaaniga ama ka tirsan Midoowga Yurub oo heli kara isu imaadka qoyska.

### Dukumeentiyada loo baahan yahay

- Warqadda joogidda ama ogolaashada joogida wadanka in aan ka yareyn hal sano, kuna salaysan xag shaqo cid kale, xag shaqo madaxbanaan, magangalio, waxbarshooma sababo diineed, ama dukumeeti cadaaynaa u dhalasho waddanka Talyaaniga ama waddan xibin ka ha Midoowga Yurub
- Dakhli sanadeed aanan ka yareyn lacag sanadeedka qoyska -assegno sociale<sup>1</sup> .si uu ugu imaado hal qof, hadii ay labo ama seddex qof yihiin waa labolaab dakhligaas, deddexlaab afar iyo wixii kabadan.
- Cadaayn xiriirshaqo:
- **Shaqaalaha shaqo cidkale**
  - Koobi warqadaha mushaarka 4 bilood oo ugu dambaysay
  - Cadaayn cidda loo shaqeeyo oo dhigan warqadda shirkada, oo ay ku tilmaamantahay waqtiga shaqada la bilaabay, mushaarka bisha, darajada iyo waqtiga heshiiska shaqada
  - Koobi ogaysiintii loo diray Xaafiska Gobolka Shaqada oo shabadaysan ama koobi raciidka boostada adag.
  - Koobi buugga shaqada (kaliya baalasha shaabadaysan ee

saxiixan)

- Koobi foomka 101 ee la xiriira dakhliga sanadkii la soo dhaafay
- Ciddi xibi ka ah iskaashato, waxaa kale oo looga baahanyahay, koobi baalka buuga ximnaha, halkaasoo lagu guuriyay haybta shaqaalaha.



Haddii loo diido waxkamaqabka isu imaadka qoska ama ogolashada sababa qoyska ama wax kasta xariira mideynta qoyska, qofku wuxuu gaysan karaa dacwad maxkamada deegaankiisa, tasso sida ku qayaxan qodobada Art. 737 iyo kuwa ku xiga ee qanuunka bulshada. Garsooruhu hadii uu garoowsado wuxuu amrikaraa in la bixiyo dal-kugalka xatta wax-kamaqab la'aan. Wax canshuur ah oo laga bixinaayo ma jiraan arimaha la xiriira dacwadaan.

• **Shaqaalaha shaqada guryaha**

- Koobi kuwii ugu dambeeyay raciidyada lacagta loo shubo I.N.P.S.
- Koobi raciidka diiwaangalinta I.N.P.S.
- Cadayn cidda loo shaqeeyo (sida kor ku xusan) iyo koobi warqadiisa aqoonsiga
- Koobi buugga shaqada (kaliya baalasha shaabadaysan ee saxiixan)
- Haddi shaqaaluhu la daganyahay qoyska: warqada deegaanka qoyska iyo cadayn martigalin.

• **Shaqaalaha shaqo madax banana**

- Koobi dakhligii u gu dambeeya (foomka “Unico”)
- Shahaadada diiwaangalinta Hay'adda bayaemushtarka, Warshadaha, Firshaxanka iyo Beeraha
- Koobi nambarka canshuurta (partita I.V.A.)
- koobi khrajka iibka sanadka socda
- cadayn la xiriirta miizaaniyada ku meel gaaraka ee shirkada ee sandaka socda, kuna qorantahay daq dhaqaaqa illaiyo bisha u dambeesay, kuna yaalo saxiixa iyo shabada xisaabiyaha.

- Dukumintio cadeynaaya inuu haysta deegaan, kaasoo waafaqaya sharciga goboleed ee la xariira guryaha shacabka<sup>2</sup>. Waliba, haddii uu jiro caruur da'doodu ka yar 14 sano waxaa loo baahanyahay ogolashad cidda guriga iskale. Cadeyntaas waxaa laga dhiibaa xafiiska dowlada hoose ee howlaha guryaha<sup>3</sup> ama Hay'adda Caafimaadka ee deegaankaas oo bixinaysa shahaadada<sup>4</sup> istaahilida nadaafadeed (idoneità igienico-sanitaria).


**Codsiga iyo bixidda dal-kugalka**

- Codsiga wax kama qabka (nulla osta) isu imaadka qoyska waxaa lageeynaa, iyadoo ku lifaaqanyihiin dukumeetiga loobaahanyahay, oo ay ku jiraan xiriirka qaraabannimo, guurka iyi da'yaraanta, oo lagu tarjumay aftalyani lagana sugay Qunsulyada Taliianiga, Farsada guud ee soogalootiga (Sportello unico per l'immigrazione) L/H Prefettura – Ufficio Territoriale di Governo ee qaabishan deegaanka qofka codsday, taasoo bixinaysa koobi lagu dhigay maalintaas iyo magaca cidda qaabishan soo dhawaynta.

Xafiisku, markuu hubiyo, isagoo ka baari kara xaafiiska booliska degmadaas, inay dukumeetigi dhabyihiin, wuxuu bixinaa wax-kamqabaka (nulla Osta), ama diiditaan, 90 maalmood gudahood, laga bilaabo marka codsiga la qabtay.

Qunsulyada talyaanigu waxay bixinee dal-kugak isu immadka qoska marka loo geeyo wax-kamaqabka (nulla osta).

Haddii aysan jawaab bixin Farsada guud ee soogalootiga (Sportello unico per l'immigrazione) lagana soo gudby 90 maalmood laga bilaabo marka codsiga la qabtay, qofkey quseyso wuxuu ka soo qaadanayaa fiisaha soo galitaanka wadanka qunsulyada talyaaniga ama mas'uulka talyaaniga ee u fadhiya wadankaas, ayadoo la waydiisan doono qofkaas inuu la yimaado koobiga dukumentigii la geeyay farsada, kuwaasoo ay cadahay maalinta laga qabtay codsiga.



1 cadada dakh

liga sanadka ee jeega daryeelka (assegno sociale): 4557,41 euro


2 wax yaabaha uu dhigaayo sharciga goboleed ee la xariira guryaha shacabka (L.R. 20 dicembre 1996, n. 96):

Masaaxada guriga	Idoneo per n° persone
Aan ka yarayn 30 mq	1 qof
Aan ka yarayn 45 mq	2 qofood
Aan ka yarayn 55 mq	3 qofood
Aan ka yarayn 65 mq	4 qofood
Aan ka yarayn 75 mq	5 qofood
Aan ka yarayn 95 mq	6 qofood ama ka badan

3 Arag baalka INDIRIZZI UTILI, n.1

4 Arag baalka INDIRIZZI UTILI, n.2

**Difaacid**



**1) U QALMIDDA HOOYGA (IDONEITA' DELL'ALLOGGIO:**

Comune di Firenze - Servizio Casa

Cinwaanka: Viale Guidoni 158, illin kale ku leh Via Almerigo da Schio 1 (jidka naafada).

**Tel:** 055 328 3589

**Fax:** 055 328 3590

**e-mail:** [direz.patrimonio@comune.fi.it](mailto:direz.patrimonio@comune.fi.it)

**waqtiga furitaanka dadwaynaha:**

Talaado iyo Arbaco 8.30 – 13.00, Talaado iyo Khamiis 15.00 – 17.00

**Howshiisa:** baaritanka iyo bixidda shahaadooyinka ku filnaashada guryaha doowlada iyo kuwa dadka oo la siiyo ajnabiga aan ka tirsanayn Midoowga Yurub si ay u helaan warqada joogista, isuimaadka qooyka iyo soogal cusub ee xag shaqo: qabashada codsiga, baaritaanka, diyaarinta, dhiibida shahaadada iyo ogeysiinta xaafiiska boolliska.

**2) Cadaynta Nadaafada iyo Caafimaadka (ATTESTAZIONE IGIENICO-SANITARIA)**

Azienda Sanitaria – Ufficio Igiene e Sanità Pubblica

Cinwaanka: Via di San Salvi 12

**Tel:** 055 6263608-40

**Fax:** 055 6263629-43

**Dadka saaran (Utenza):** dadka deggan Degmada Firenze

**3) Xarumaha Bulshada iyo Cafimaadka ee laga bixiyo warqada STP( tesserino STP)**

iyu wargalinta Degmada Firenze (xarumaha kale ka firso “Guida ai Servizi” (daabicidda IV) ee adeega soogalootiga Degmada Firenze):

- Via Verdi 16, **Tel:** 055 244552
- Via di Ripoli 96, **Tel:** 055 6580546
- Lungarno Santa Rosa 13, **Tel:** 055 2285897 – furan maalinta jimcaha saacadaha 12.30 - 14.30
- Viale Matteotti 48, **Tel:** 055 62641
- Viale Morgagni 33, **Tel:** 055 2285300

**4) CAMERA DI COMMERCIO, INDUSTRIA, ARTIGIANATO E AGRIGOLTURA DI FIRENZE**


Cinwaanka: Piazza dei Giudici 3

**Tel:** 055 27951

**Fax:** 055 2795259

**E-mail:** [info@fi.camcom.it](mailto:info@fi.camcom.it)

**Aalada Interneetka (Sito web):** [www.fi.camcom.it](http://www.fi.camcom.it)



**5) XAAFIISKA DIIWAANGALINTA DEGMADA FIRENZE  
(UFFICIO ANAGRAFE DEL COMUNE DI FIRENZE)**

Cinwaanka: Via dei Leoni 5, furan: isniin illa sabti saacadaha 8,30 -13,00; khamiis saacadaha 8,30 -18,30

**Tel:** 055 27681

**6) UFFICIO DI STATO CIVILE**

Cinwaanka: Palazzo Vecchio, P.za della Signoria, qolka n.4 dabaqa hoose,

Furan: dalle 8.30 alle 13.00, isniin illa sabti

**Tel.:** 2768276 – 2768370

**7) JAAMACADDA FIRENZE , XOGHAYNTA ARDADA AJNABIGAA  
UNIVERSITÀ DI FIRENZE, SEGRETERIA STUDENTI STRANIERI**

Cinwaank: Piazza S. Marco n.4

**Tel:** 0039 055 2757229

**Fax:** 055 275768

**E-mail:** [ustr@adm.unifi.it](mailto:ustr@adm.unifi.it)

**waqtiga furitaanka dadwaynaha:** Isniin, Arbaco iyo jimco: saacadaha 9.00-13.00; Talaado iyo Khamiis 9.00-10.30.

